

M I I D



Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga iyo Warshadaha

WARBIXINTA WAX-QABADKA 3dii BILOOD EE U DANBEEYAY 2021



Table of Contents



HORDHAC 1	3
Kulamadii Madaxda Wasaaraddu yeelatay	4
Shirkii China Railway Construction	5
Shirkii Almatuco Tobacco Co.FZE	6
Shirkii Wakiilka Imaraatka Carabta (UAE).	7
Shirkii Safaaradda Taiwan ee Somaliland	8
Shirar kale oo dheeraada	9
U guuristii Dhismaha Cusub ee Wasaaradda	10
Carwadi Wax-soo Saarka Warshadaha	12
Warshadaha 2021 Ladiwangaliyay	13
Xog-ururintii Wax-soo Saarka Warshadaha	14
Samaynta Documentariga Wax-soo Saarka Warshadaha	15
Samaynta Siyaasadaha iyo Shuruucda Horumarinta Maalgashiga Dalka	16
Dhaqan Galinta Xeerka Maalgashiga Dalka	16
Dhamaystirka Qabyo-qoraalka (PPP POLICY)	17
Diyaarinta Nidaamka Casriga ah ee Diiwaan Gelinta (Investor Registration Management System)	18
Waxyaabaha Qorshaysan	18
Gunaanad	18

1. HORDHAC



Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga iyo Warshaduhu iyadoo ka duulaysaya kaalinta qaranka ay u metasho una asaasantahay sida uu sheegayo Xeer-nidaamiyaha Dhismaha Wasaaraddaha iyo Hayadaha Xukuumadda Xeer Lr.01/2018 qodobadiisa 33 aad iyo 20 aad waxa shaqooyinkeeda ka mid ah u adeegida maalgashatada maxalliga iyo ajaanibkaba ah, iib gaynta khayraadka dalka, bandhigida ilaha maalgashiga, xayeysiinta iyo baahinta fursadaha maalgashi, iyo dhiirgalinta, maalgashatada

Iyadoo shaqadaas iyo waajibaadkaas ka duulaysa wasaaraddu isla markaana madaxda cusub ee madaxwaynuhu soo magacaabay dareensan culayska ay leedahay shaqada qaranku u igmaday ee laga sugayo waxay samaysay sadexdii bilood ee u danbeeyay sanadkii dhamaaday ee 2021 dadaalo badan sida samaynta siyaasado, xeerar, hageyaal, iyo qorshayaal, ay ku goobayso kuna raadinayso badhaadhaha iyo barwaaqaysiinta dalka Somaliland, yaraynta xaddiga fakhriga, shaqo abuur iyo yaraynta heerka shaqo la'aanta, kobaca dhaqaalaha, xidhiidho iyo heshiisyo maalgashi oo caalamiya.

Wasaaraddu waxay dhiiri galinaysaa maalgashiga qaybaha mudnaanta leh ee dalku leeyahay, sida beeraha, Tamarta iyo Macdanta, kalluunka, xoolaha nool iyo wershadaha, Tiknoolajiyada, heerarka wax-soosaarka (Beeraha, Xoolaha iyo Kalluunka).

Iyadoona lasoo koobi Karin wax-qabadkii iyo dadaaladii ay Wasaaraddu mudooyinkii u danbeeyay samaysay waxay halkan hoose kusoo gudbin doonaa wax-qabadyada ugu mudan ee la taaban karo ee lagu talaabsaday 3dii bilood ee u danbeeyay sanadkii dhamaaday ee 2021.



2. Kulamadii Madaxda Wasaaraddu yeelatay

Sadexdii bilood ee u danbeeyay sanadkii dhamaaday waxay madaxda sarsare ee wasaaradda iyo agaasime waaxeedyaduba ka qayb galeen isla markaana qabanqaabiyeen shirar kuwaas oo ku saabsan horumarinta maalgashiga iyo warshadaynta dalka isla markaana lagag hadlayey xogta guud ee maalgashiga dalka iyo fursadaha bannaan kuwaasoo intooda badan lala yeeshay maal-qabeeno., madax iyo ururo caalamiyaba. Shirarkaas oo ay ugu muhiimsanaayeen kuwan:-

2.1. Shirkaa China Railway Construction

09.11.2021 Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga iyo Warshadaha Mudane Cabdilaahi Cabdiraxmaan Aare ayaa xafiiskiisa ku qaabiley wafti ka socday shirkadda dhismaha ee China Railway Construction Co. LTD. Weftigaas ka socday shirkada caalamiga ah ayaa dalka u yimid si'ay u helaan xog ku saabsan fursadaha maalgashi ee dalka ka jira isla markaana ay u maalgashadaan.

Waftigan ayaa wasiirka wasaaradda maalgashiga la qaatay kulan qaatay saacado, oo fool-ka foola, waxaanu kusoo gabo gaboobey jawi qaneeco is af-garad kaas oo u gogol xadhaya xidhiidho ganacsi iyo diblomaasiyadeed oo dhex mara dalalka China iyo Somaliland, waxaan soo baxday inay u qabaan buseel inay dalka maalgashadaan, isla markaana waxay mareen diiwa gelintii sharciga ahayd ee WHMIW.



2. Kulamadii Madaxda Wasaaraddu yeelatay



2.2. Shirki Almatuco Tobacco Co.FZE

02.11.2021 Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga iyo Warshadaha Mudane Cabdilaahi Maxamed Aare iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga iyo Warshadaha Mudane Maxamed Cismaan Siciid iyo La taliyaha madaxweynu ku xigeenka Xuseen Muuse AL-shaqi , ayaa waxa uu la qaatay kulan fool-ka foola madaxda shirkada weyn ee Emaratka laga leeyahay ee Almtuco Tobacco, waxaana shriakan ka qayb galay masuulka ugu sarreeya ee shirkadaasi caalamiga ah.

kulankani oo ahaa mid muhiima isla markaana fursadaha maalgashi ee dalka ka jirey loogu tibaacxayay ganacsatadaas caalamiga ah, waxaanu ku soo gabagaboobay jawi af-garad iyo mid qaneeco oo sare, isla markaana waxay helaan xog ku filan iyo fursad ay ku maalgashanayaan dalkeena Somaliland, waxaanay danaynayeen dhanka beeraha isgaadhsiinta.



2. Kulamadii Madaxda Wasaaraddu yeelatay

2.3. Shirkaa Wakiilka Imaraatka Carabta (UAE).

02.10.2021 Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga iyo Warshadaha Mudane Cabdilahi Cabdiraxman Aare iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga iyo Warshadaha Marwo Farxiya X. Maxamed Cabdiraxman ayaa xafiiska ku qaabilay wakiilka Imaaradka Carabta (UAE) u qaabilsan Somaliland Hon. Cabdulla Alnaqbi, kulankan oo ahaa kii noocisa ah ee ugu horeeyay ee safiirku Wasaaradda booqasho ugu yimaado tan iyo intii wasiirka lasoo magacaabay.

Ujeedada shirkan ayaa daarnaa isbarasho iyo soo dhawaynta labada masuul midba midka kale kusoo dhawaynayey xafiiska isla markaana loo bilaabi lahaa loogana wada shaqayn lahaa maalgashi iyo wax soo-saar dalka lagu sameeyo oo ay qayb ka noqdaan maalqabeenada Imaaraadka Carabtu.

Ugu danbayn kulanka ayaa kusoo gabogaboobey ooy labada dhinac isla qaateen in la xoojiyo sidii looga shaqayn lahaa in la maalgashado Somaliland maadaamo ay leedahay khayraad dihin.



2. Kulamadii Madaxda Wasaaraddu yeelatay

Sadexdii bilood ee u danbeeyay sanadkii dhamaaday waxay madaxda sarsare ee wasaaradda iyo agaasime waaxeedyaduba ka qayb galeen isla markaana qabanqaabiyeen shirar kuwaas oo ku saabsan horumarinta maalgashiga iyo warshadaynta dalka isla markaana lagag hadlayey xogta guud ee maalgashiga dalka iyo fursadaha bannaan kuwaasoo intooda badan lala yeeshay maal-qabeeno., madax iyo ururo caalamiyaba. Shirarkaas oo ay ugu muhiimsanaayeen kuwan:-

2.1. Shirkaa China Railway Construction

09.11.2021 Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga iyo Warshadaha Mudane Cabdilaahi Cabdiraxmaan Aare ayaa xafiiskiisa ku qaabiley wafti ka socday shirkadda dhismaha ee China Railway Construction Co. LTD. Weftigaas ka socday shirkada caalamiga ah ayaa dalka u yimid si'ay u helaan xog ku saabsan fursadaha maalgashi ee dalka ka jira isla markaana ay u maalgashadaan.

Waftigan ayaa wasiirka wasaaradda maalgashiga la qaatay kulan qaatay saacado, oo fool-ka foola, waxaanu kusoo gabo gaboobey jawi qaneeco is af-garad kaas oo u gogol xaadhaya xidhiidho ganacsi iyo diblomaasiyadeed oo dhex mara dalalka China iyo Somaliland, waxaan soo baxday inay u qabaan buseel inay dalka maalgashadaan, isla markaana waxay mareen diiwa gelintii sharciga ahayd ee WHMIW.



2. Kulamadii Madaxda Wasaaraddu yeelatay



2.6. Shirar kale oo dheeraada

Waxaa jira shairar kale oo muhiima isla markaana isugu jira kulanka Fogaan-aragga iyo Fool ka foolba kuwaas oo ay **Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga iyo Warshadaha Mudane Cabdilaahi Cabdiraxman Aare** iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga iyo Warshadaha ay la qaateen daneeyayaashaas kala duwan ee hibanaya inay maalgashi lku sameeyaan qaranka.

A. African Development Bank

B. IFC

C. Embassy Taiwan

D. Malaysian Investors

E. Awash Bank

Kuwaas oo dhamaantood lagaga hadlayey horumarinta maalgashiga iyo fursadaha maalgashi ee dalka ka jira, kuna soo dhammaaday jawi Af-garasho iyo wada shaqayn muhiima.

3. U guuristii Dhismaha Cusub ee Wasaaradda



Kadib markii lagu soo daray Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga waaxda Warshadaha ee ka mid ahayd Wasaaradda Ganacsiga isla markaana ay madaxda Wasaaraddu ku qanceen inaanu dhismihii hore ee ay wasaaraddu ku jirtay aanu ahayn mid ku haboon wasaaradda isla markaana aanu ahayn mid soo jiidanaya maalgashatadda shisheeye ee la rabo inay dalka maalgashadaan waxay go'aansadeen inay Wasaaradda u raraan dhisme ku haboon isla markaana ay wada gali karaan dhamaan waaxyaha kala duwan ee wasaaraddu.

Sidaasi darteed ayaa dadaal dheer ka dib waxay madaxda Wasaaraddu ku guulaysteen inay wasaaradda u raraan dhisme waafi ah oo wada qaadi kara dhamaan waaxyaha wasaaradda isla markaana ku haboon shaqada ay wasaaraddu qaranka u hayso.



4. Carwadi Wax-soo Saarka Warshadaha



04.12.2021 waxa Hallka Tiyaatarka ee magaaladda hargaysa ay Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga iyo Warshadaha oo kaashanaysa Wasaaradda Ganacsiga iyo Dalxiiska, Wasaaradda Maaliyada iyo Rugta Ganacsiga ay qabatay Carwada bandhiga Wax-soo saarka Warshadaha Dalka. Bandhigan heer-qaran, bandhigana ayaa waxaa kasoo qayb galay wufuud heer-qaran iyo kuwo caalamiyaba, waxaa dhacay iib celicelis ahaan ku xusan jaantuska hoose, wadarta shacabka kasoo qayb galay.

Shaxdan hoose waxay muujinaysaa xaaladda Warshadleyda Dalka sida tirada Warshadaha ah ee Shaqaysa, tirada Warshadaha ah ee xidhmay, tirada Warshadaha ah ee Diiwaangashan balse aan wali bilaabin shaqo warshadeed iyo tirada Warshadaha ah ee helay cashuur dhaaf sadexdii sano ee u danbeeyay.

Wasaarada Maalgashiga iyo Horumarinta Warshaduhu Waxay Qaranka uga Masuul tahay Horumarinta Warshadaha Dalka, si loo gaadho yoolka la higsanayo oo ah in laga guuro bulsho noloshooduba ay ku tiirsantahay badeecado Dalka dibadiisa uga yimaadda, iyada oo xoogga la saarayo Waxsoo saarka warshadaynta Dalka gudihiisa.



Shaqeya	54
Xidhmay	9
Diiwaangashan kaliya	17
Cashuur Dhaaf helay sadexdii sano ee u danbeeyay	80

Carwada Warshadaha Dalka ee Made in Somaliland

Hal ku-dhigga Carwada:

Warshadaheena ka doorbida kuwa shisheeye

Sponsors



04 Dec, 2021

Theater Hall

4. Carwadi Wax-soo Saarka Warshadaha



Ujeedada Carwada Waxsoo-saarka Dalka

- In lasoo bandhigo waxsoosaarka warshadaha dalka
- In lagu dhiirigeliyo Maalgashadayaasha gudaha iyo Dibadaba fursadaha maalgashiga warshadaynta ee dalka ka jira.
- In dadweyanaha la baro waxsoosaarka warshadaha dalka.
- In la ogaado waxsoosaarka warshadaha dalka.
- In la ogaado noocyada warshadaha ee dalka ka jira.
- In la heli karo maalgalin dibadeed hadii la ogaado inay jiraan warshado waxsoosaarkoodu aad u tayo sareeyo.

Waxaa ugu horeyn furay Carwada Wasiirka Wasaarada Maalgashiga iyo Horumarinta Warshadaha Mud: Cabdilaahi Cabdiraxmaan Aare waxaanu yidhi "Run ahaantii waxsoosaarka warshadahuu way kobcayaan waxaana tusaale ah carwadan carwadii ka horeysay waxaa kasoo qayb galay dhawr iyo sodon warshadood maantana waxaa ka qayb galaya carwadan dhawr iyo afartan warshadood taas macnaheedu waxa weeye inay warshadihii kobcayaan markaa mudo sanad ah ama sanad wax ku dhow in tobaneeyo wax ku dhow ay kusoo biiraan Warshadaha".

Sidoo kale waxaa halkaa ka hadlay Wasiirka Wasaarada Maaliyada Mud: Sacad Cali Shire oo yidhi "Wadan walba waxaa lagu qiyaasaa horumarkiisa warshadihiisu intay le'egyihin ama dhaqaalihiiisa ay ku daraan (GDP)".

Waxaa kaloo halkaa ka hadlay Gudoomiyaha Rugta Ganacasiga Somaliland Mud: Jamaal Caydiid oo yidhi "Waxaa jira Warshado badan oo gaadhay heer dhoofin (Exporter) Kuwaas oo ku filnaaday dalka"



4. Carwadi Wax-soo Saarka Warshadaha

WAX SOO SAARKA LAGU SOO BANDHIGAY CARWADA

1. Furaashyo (buush)
2. Biyo
3. Sharaabka (noocyada Coca-Cola)
4. Sharaabka buda ah (powder)
5. Saabuunta budada ah
6. Shaamoo iyo nadiifiyeyaal kale
7. Caano buda ah iyo ciirta (milk powder)
8. Nac nac
9. Chips
10. Tuunbooyinka caaga ah (PCV)
11. Bacaha
12. Doonyo caaga ah
13. Taangiyada biyaha oo caaga ah
14. Waraaqaha caabacada iyo buugaag
15. Maaska (leather)
16. Marmarka dhulka la dhigo.
17. Rootiga iyo keega.
18. Ranjiga
19. Jiingadaha (Steel processing)
20. Daqiiqda (National Flour mills)



5. Warshadaha 2021 Ladiwangaliyay



NO	Magaca Warshada	Nooca wax soo-saarka	Goobta
1	A&C roofing factory	Steel	Hargeisa
2	Ankha Co	Non-woven & Fiber bags	Hargeisa
3	Aalla- Yasir bakaries	Bakery	Hargeisa
4	Baabul-ryan shoes & bags factory	PVC & Bags	Hargeisa
5	Bags factory	Bags	Hargeisa
6	Burco modern slaughter house	Slaughter house	Burco
7	Burco foam factory	Foam	Burco
8	Dalmar mixing batch plan & plastic recycling	Mixing plant & Plastic recycling	Hargeisa
9	Dhalaal industries corporation	Taydh	Boorama
10	Diamond Industry	Recycling	Hargeisa
11	Sombags factory	Bags	Hargeisa
12	Fascot enterprise factory	Take away & Soft	Hargeisa
13	Golden furniture factory	Furniture	Hargeisa
14	Hargeisa modern abattior house	Slaughter house	Hargeisa
15	Hatay furniture factory	Furniture	Hargeisa
16	Hodan tamato factory	Tamato paste	Borama
17	Idico 2	Liquid shampoo & bleach laundry	Burco
18	Isha togdheer	Mineral water	Berbera
19	Maz industries L.T.d	Onetime Utensils	Hargeisa
20	Mobile fundi technology	Ranjiga baaburta	Hargeisa
21	Nada diary processing	Yoghurt	Hargeisa
22	National food & Beverage Industry	Tamato paste	Berbera
23	Natural oil & fragrances	Oil	Hargeisa
24	Nice factory	Cartons	Hargeisa
25	Shaam crusher & concrete co	Crusher	Hargeisa
26	Shoodh fashion factory	Dharka	Hargeisa
27	Singdan factory	Furniture & Paints	Hargeisa
28	New Recycling industry	Recycling	Hargeisa
29	S/land myrrhh & frankincense	Beeyada & Malmalka	Hargeisa
30	Tayosan shampoo	Shampoo	Laascanod
31	Parent factory	Food processing	Hargeisa
32	Freshnaan paratha & chapati bakery	Bakery	Hargeisa
33	Caddosan Salt factory	Salt	Berbera
34	Mohinee plast	plastic	Hargeisa
35	Nurada essa group factory	Nuurad	Hargeisa
36	Iman tiles factory	Marmarka dalka	Hargeisa
37	Marwo shampoo factory	Shampoo	Laascanod

6. Xog-ururintii Wax-soo Saarka

Iyadoo ay madaxda wasaaraddu ka duulayso ahmiyada iyo faaiidada balaadhan ee ay leedahay in la ogaado xaaladaha guud ee ay ku sugan yihiin warshadaha dalku iyo waxsoosaarkooda iyo sidoo kale doorka waxsoosaarka warshaduhu ku leeyahay kobaca dhaqaalaha dalka ayaa laba kooxood oo ka tirsan shaqaale waynaha Wasaaradda oo ay kala hogaaminayaan Wasiirka Wasaaradda iyo Agaasimaha Guud Waxay Cilmi-baadhis baaxadle 22.11.2021 ay ku sameeyeen warshadaha Dalka, kaas oo lagu ogaanyey looguna kuur-galayey xogta xaaladaha iyo wax-soosaarka wershadaha dalka. Natijada iyo warbixinta cilmi baadhista ayaa waxaa lasoo bandhigi doonaa bisha 1aad ee sanadkan.





7. Samaynta Documentariga Wax-soo Saarka Warshadaha

Muuqaal documentary ah oo si heer-sare ah loo sameeyey ayaa laga baahin doonaa warbaahinta isla markaana lagu soo bandhigayo si cilmiyeysan oo cadaymo wadata wax-soo saarka dalka gudihiisa lagu sameeyo si loo gaadhsiiyo dhammaan dunida iyo dalkeenaba. Waxaana muuqaalka socda farsamadiisii se duubistii iyo xog ururintiisii way soo dhammaatay.



Sababaha Mashruucan Muuqaalka Loo Samaynayo

- Ogaanshaha Xogta Wax-soo saarka Dalka
- Baahinta iyo gaadhsiinta bulshada Somaliland wax-soosaarka dalkooda
- Dhiiri gelinta ganacsatada waaweyn ee maalgashaday dalka



8. Samaynta Siyaasadaha iyo Shuruucda Horumarinta Maalgashiga Dalka



8.1 Dhaqan Galinta Xeerka Maalgashiga Dalka

Xeerka Maalgashiga dalka ayaa hadda ah mid dhaqan galay isla markaana lagu dhaqo maalgashatada, waxaanu wax badan ka taray baahidii loo qabay xeer maalgashi xaq, xuquuq, iyo xadayn ayaa ku cad xeerka. Waana mid dhammaystiran qodob-qodobna u dul istaagaya wax-kasta oo maalgashi ku lug leh.

Sidaasi darteed iyadoo laga duulayo dardar galinta xeerkan iyo gaadhsiinta maalgashatadda dalka iyo kuwa dibadaba ayaa waxay wasaaraddu diyaarisay qorshe iyo qodobo lagu dhaqan galinayo xeerkan sida:

A. Wada tashiyo lala yeelanayo daneeyayaasha xeerka sida Wasaaraddaha, Maalgashatada iyo qaybaha kala duwan ee uu xeerkani saamayn togan iyo mid tabanba ku leeyahay.

B. Xaflad lagu daahfurayo laguna shaacinayo faaiidada iyo fursadaha maalgashi ee uu xeerkani leeyahay.

8.2 Dhamaystirka Qabyo-qoraalka (PPP POLICY)

Madaxda Wasaaraddu waxay dardar galin iyo dadaalba ku bixiyeen sidii loo dadajin lahaa dhamaystirka siyaasadda Wax wada lahaanshaha dawlada iyo Ganacsatada (PPP POLICY) iyadoo la dhamays tiray qabyo qoraalkii 1aad ee siyaasaddas isla markaana la qorsheeyay sidii loo dhamays tiri lahaa siyaasaddan horaanta sanadkan cusub.

Siyaasadaan wax wada lahaansha dawladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay, ayaa ah mid mihiim u ah qaranka isla markaana siin doonta dawlada iyo shirkadaha gaarka ahba, iskaashi maalgashi oo abuuraya jawi dhaqaale oo is garabsanaya, taas oo koboca iyo quwaynta dhaqaalaha dalka ka qayb qaadanaysa siyaasadan ayaa in hantida dawladda gaarka, sida dhulka iyo xarumaha dhisan lagula galo heshiisyo dhaqaale, isla markaa loo fuliyo mashaariic abuuraya fursado shaqo, maalgalin iyo dhaqaaleba.

9. Diyarinta Nidaamka Casriga ah ee Diiwaan Gelinta (Investor Registration Management System)











Waxaa la sameeyey nidaamka diiwaan galinta ee (Investor Registration Management System), Nidaakan oo lagaga maarmi doono nidaamkii hore ee maalgashatada loo diiwaan galin jirey, nidaamkan ayaa ah mid casriya isla markaana adunyadu inta badan lagu diiwaan galiyo maalgashatada hab online ahna ay ku qaadan karaan shahaadada maalgashiga iyagoo aan iman wasaaradda amma dalka dhammaan shuruudahana ku maraya nidaamka online'ka ah.



Admin

MolP License System



 Add Company	 Company List	 Approve Company	 Report
 Categories	 User Logs	 Account Settings	 Log Out

Companies registered 27	Licenses Created 11	Investment Made \$44,252,123	No of people employed 174
Locals employed 156	Foreigners employed 18	Year 1 Investments \$9,634,807	Year 2 Investments \$4,196,971
		Year 3 Investments \$4,009,772	

10. Waxyaabaha Qorshaysan

a. Dhamaystirka Siyaasadaha iyo Xeerarka muhiimka u ah maalgalinta dalka.

b. Samaynta qorshaha iyo strategyada 5ta sanno ee Wasaaradda.

c. Samaynta cilmi-baadhis iyo daraasaddo lagu ururinayo xogaha maalgashiga dalka.

d. U bixista safaro dibadeed oo loogu kuur galayo sida u shaqeeyaan haayadda maalgashi ee dalalka jaarka iyo sidii maalgashato caalamiya loogu soo jiidi lahaa dalka.

e. Soo saarista iyo daabacaada hagayaasha iyo habraacyada maalgashatada iyo sida loo maalgashado dalka.

f. Dhiiri galinta maalgashatada iyo suuq gaynta xogaha iyo ilaha maalgashiga iyo khayraadka dalka.

g. Kobicinta iyo kor u qaadista aqoonta shaqaale waynaha wasaaradda.

11. Gunaanad

Dhamaan wax-qabadkaas baaxada leh ee kor ku xusan oon runtii ahayn dhamaan wixii la qabtay mudadii sadexda bilood ahayd ee ay wasaaradda joogeen madaxda cusub, balse ah kuwoogii ugu muhiimsanaa, sidoo kale waxa jiray waxyaabo badan oo aan warbixintan lagu xusin oo wasaaradda u qabsoomay.

Tani waxay muujinaysaa dadaalka aan kala joogsiga lahayn iyo kartida aan la dafiri Karin ee ay muujiyeen Wasiirka iyo Agaasimaha guud oo runtii labadooduba ku cusbaa shaqada qaranka iyo tan wasaaraddaba balse aad isugu taxalujiyay sidii ay uga midho dhalin lahaayeen waajibaadka iyo shaqada ay qaranka u hayaan.



WARBIXINTA WAX-QABADKA 3dii BILOOD EE U DANBEEYAY 2021

www.Moiid.govsomaliland.org
Info@moiid.govsomaliland.org
Shacab, Hargeisa, Somaliland